

Tallaalada COVID-19 iyo Taranka.

Miyay tahay inaynu ka fikiro?



Waxaa laga yaabaa inaad maqashay in talaalada mRNA, sida kuwa Pfizer iyo Moderna, ay beddeli karaan DNA-daada ama ay faragalin doonaan fursadaada inaad ilmo dhasho. Way fiicantahay inaad su'aalo qabtid oo aad warqabtid! **Waa tan waxaad u baahan tahay inaad ka ogaato tallaalada COVID-19.**



Maxaa ku dhex jira tallaalada mRNA?

Tallaalada mRNA waxay ka kooban yihiin messenger RNA, biyo, sonkor, milix iyo dufan (dux) aan laga keenin xoolo. **Tallaalada kuma jiraan fayras nool marka kuma tarmi karaan jirkaaga si aad u bukooto.**



Sidee ayay tallaaladu u shaqeeyaan?

Jirkaaga ayaa akhrinaya koodhka mRNA wuxuuna samaynayaa borotiinka isbeek oo la mid ah kan fayraska COVID-19. Unugyadaadu waxay u aqoonsan yihiin borotiinadan inay yihiin khatar wayna baabi'inayaan iyaga oo u abuuraya unugyada difaaca jirka howshan Haddii aad qaado fayraska, jirkaaga hadda wuxuu leeyahay unugyo difaaca jirka ah oo kaa difaacaya.



Tallaalada miyay beddelayaan DNA-gayga?

Maya, jirkaagu wuxuu baabi'iyaa mRNA kadib markuu isticmaalo mana faragalinayo DNA-daada. Waxaad u malayn kartaa in howshan tahay sida Snapchat, **si dhakhso leh ayay u baaba'aysaa oo kuma sii jirto jirka muddo dheer.**



Tallaaladu ma sababi karaan waxyeello muddo dheer sida madhalaysnimo?

Maya, gabi ahaanba ma jirto wax caddaynaya in tallaalku la falgalayo qaybaha jirkeena ee ku lug leh bacriminta sida maskaxdeena iyo nidaamkeena taranka.



Ma heli karaa carruur kadib markaan qaato tallaalka COVID-19?

Haa, 23 qof ayaa uur yeeshay kadib markay heleen tallaalka intii lagu jiray tijaabooyinka caafimaad ee Pfizer-BioNTech. Ilaa hadda, wax saameyn ah oo xun lagama soo sheegin dadkan.